FEDERAL GOVERNMENT
OF SOMALIA



# Warbixinta Maamulka Maaliyadda

Sebtember 2021







WORLD BANK GROUP





# GOGOLDHIG

Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021 waa warbixintii shannaad ee Guddiga Maamulka Maaliyadda. Waxay soo bandhigaysaa aragtida wadajirka ah ee xubnaha guddiga ee ku aadan horumarka maamulka maaliyadeed ee Soomaaliya sannadkii la soo dhaafay, iyo mudnaanta sanadka soo socda. Warbixinaddi hore waxaa laga heli karaa barta-internerka (Mareegta) ee Guddiga Maamulka Maaliyadda.[1]

Kaalinta Xogheynta ee soo saarista warbixintantan waa mid la mahdiyay.

---

[1] Eeg bogga internetka wixii macluumaad dheeraad ah: https://mof.gov.so/fgc

# DULMAR KOOBAN

## Horudhac

Guddiga Maamulka Maaliyadda waa guddi la-talin heer sare ah, oo ka kooban xubno sar sare oo ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo wakiillo caalami ah. Waxay DFS siisaa madal wadahadal iyo talo la isku halayn karo oo ku saabsan arrimaha maamulka maaliyadeed ee istiraatiijiga ah iyo kuwa xasaasiga ah. Talada Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay dabooshaa arrimaha maaliyadeed, qandaraasyada iyo heshiis bixinta, maareynta kheyraadka dabiiciga ah, iyo maamulka bangiga dhexe. Kaalinta Gudigga waxay ku kooban tahay tala bixin kaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxay leedahay waajibaad ah inay dib u eegto oo ay talo ka siiso DFS dhammaan heshiisyada bixinta iyo dhammaan qandaraasyada wax soo iibsiga ee ka sarreeya 5 milyan oo doolar ka mareekanka ah.

Guddiga wuxuu u kulmaa si joogto ah sannadka oo dhan, wuxuuna siiyaa talooyin DFS, iyada oo la adeegsanayo wada-hadal, ka-qaybgalka daneeyayaasha, qoraalo latalin rasmi ah, dib u eegis qandaraas, iyo caawin farsamo. Warbixinta Maamulka Maaliyadeed waxay dib u eegis ku samaysaa horumarka laga sameeyay arrimaha ay guddiga ka wada hadleen sannadkii la soo dhaafay. Waxaa sidoo kale ku jira cutubka loogu magac daray 'Diiradda' kaa soo si qoto dheer uga hadlaya mowduuc la soo xulay, si uu u sharaxo xaaladda taagan, isagoo eegaya mudda sanaddeedka guud ee Warbixinta Maamulka Maaliyadeed si loo aqoonsado casharrada, caqabadaha joogtada ah ee ka hor imaanaya horumarka, iyo mudnaanta dib-u-habaynta. Arrinta diiradda sannadkaan ayaa lagu eegayaa isla jaanqaadka nidaaminta waaxyaha iyo dib u habaynta maamulka maaliyadda.





# Dib-u-eegidda Luuliyo 2020 ilaa Juun 2021

Laga soo bilaabo Luulyo 2020 ilaa Juun 2021, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay la kulantay caqabado aad u adag oo la xiriira arrimaha siyaasadda maaliyadda, oo ay sabab u ahaayeen caqabadihi isbiirsaday ee caabuqa COVID-19 iyo dib u dhacyadii ku yimid geedi socodka qorshaha doorashada 2021. Sida la saadaaliyay, masiibada caabuqa COVID-19 waxay saamayn weyn ku yeelatay dakhliga gudaha, oo aan ku filnayn inuu si buuxa u daboolo bixinta mushaaraadka ee DFS. Taageerada maaliyadeed ee la kordhiyay ayaa ka caawisay DFS bixinta kharashaadki sanadki 2020. Balse, qabsoomida doorashada 2021 oo aan la isku waafaqsaneyn ayaa keentay hoos u dhac ku yimid taageerada maaliyadeed ee ay beesha caalamka siisay DFS horaantii sanadka 2021.

Xaaladda dhaqaale ee ba'an waxay sare u qaadday khatarro badan oo ku wajahan maamulka maaliyadda, oo ay ka mid tahay awood la'aanta in mushaaraadka lagu bixiyo waqtigoodi, dhiirrigelin wada xaajoodyo heshiisyo qandaraas oo u muuqda inay keenayaan guulo degdeg ah oo ah dakhli soo xaroonaya, iyo dib u dhac ku yimid dardargelinta dib u habaynta maamulka maaliyadda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa mudnaanta ugu sareysa siisay ku bixinta mushahaarka wakhtigooda, iyada oo isku dubaridday dhammaan ilaha dhaqaale ay heli karto si loo gaaro ujeeddadan, halka habsami u socodka dib u habaynta ay weli tahay mid wanaagsan. Si kastaba ha ahaatee, hadii aan si guul leh loo soo gabagabeyn geedi-socodka doorashada, DFS yana aysan helin maalgalin dibadeed oo dheeraad ah, xaaladda maaliyadeed ayaa noqonaysa mid aad u ba’an.

Iyadoo laga duulayo xaaladaha sare ku xusan, talooyinka Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay diiradda saarayeen ilaalinta dib u habaynta maaliyadda, kormeeridda wax-soo-iibsiga iyo heshiisyada, iyo hubinta hufnaanta iyo hannaanka maareynta dakhliga khayraadka dabiiciga ah. Iyadoo la tixraacayo waajibaadkooda, Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay sidoo kale xoogga saareen xoojinta maamulka bangiga dhexe iyo horumarinta waaxda maaliyadda.

# Ilaalinta dib u habaynta maaliyadeed




## Sare u qaadida dakhliga

DFS waxay sii waday inay horumar ka samayso casriyeynta iyo jaangooynta maamulka canshuuraha Muqdisho iyo dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS ee leh xarumo canshuuro oo waaweyn. Ujeeddada dadaalladan ayaa ah in la dajiyo hal nidaam canshuuraad oo ka hawlgala dhammaan dekedaha iyo garoomada diyaaradaha, lana hirgaliyo khidmadda guud ee canshuur bixinta qaranka iyadoo la adeegsanayo nidaamka ku salaysan qiimaha.

Kordhinta dakhliga ka soo xarooda isgaarsiinta ayaa sidoo kale ahmiyadda koowaad u leh DFS. Gudigga Maamulka Maaliyadda waxaa uu bixiyay talo ku saabsan tillaabooyinka lagu dhammaystirayo hirgelinta qaab dhismeedka iyo sidii loo xoojin lahaa ururinta iibka iyo canshuuraha dakhliga shirkadaha. Si loo guuleysto, tallaabooyinkan waxay u baahan doonaan in taageero siyaasadeed oo joogto ah, si loo meelmariyo u hoggaansanaanta shirkadaha isgaarsiinta oo leh ruqsad, soo gudbin warbixin, iyo u hogaansanaan shuruudaha canshuuraha.

Dakhliga ka soo xarooda diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa magaca Soomaaliya ku soo uruuriya heyadda caalamiga ah ee IATA. Waxa ku adkaaday IATA inay ka qaaddo khidmadada isticlaamka hawada qaar ka mid ah shirkadaha duulimaadyada maxalliga ah iyo kuwa gobolka ee ka shaqeeya Soomaaliya oo aan xubin ka ahayn IATA. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxuu DFS ka taageeray diyaarinta tartan furan oo loo galo bixinta adeega ururinta deynta maqan.

## Nidaamka Maaliyadda Federaalka

Wali ma jiro heshiis guud oo u dhexeeya DFS iyo dowlad goboleedyada oo ku saabsan sida dakhliga loo qoondeyn doono, heer degmooyin, iyadoo la waafajinayo xilalka ka saaran kharash bixinta kaa oo ku dheehan horumar loo siman yahay. In kasta oo hannaanka dib-u-eegista dastuurka uu bixinayo fursad lagu dejinayo hannaan lagu hago wadaagista guud ee kheyraadka, hadana la-tashiyada lagu sameynayay qabyo-qoraalka ay diyaariyeen Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka waxaa hakad geliyey caabuqa COVID-19 iyo dib-u-dhacyada geeddi-socodka doorashada 2021.

Si kastaba ha ahaatee, DFS waxay sii waday inay siiso dowlad goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir dakhlig ka soo xarooday. Lacagaha loo diray sannadka 2020 waxay ahaayeen kuwo baaxad leh, oo isugu jira taageerada miisaaniyadda ee beesha caalamkaiyo maalgelinta mashriicda, dakhliga DFS, iyo dakhliga ka yimid shatiga kaluumeysiga oo ay wadaagaan DFS iyo dowlad goboleedyada. Lacagaha ay DFS u dirto dowlad goboleedyada ayaa aad hoos ugu dhacay horaantii 2021, taa oo ka dhalatay caqabadaha guud ee dhanka dhaqaalaha. Howlaha farsamo ee nidaamka maaliyadda federaalka ayaa si habsami ku socday, iyada ay wasaaradda maaliyadda hormar ka sameesay isku xirka maaliyadeed ee DFS iyo dowlad goboleedyada, taas oo gundhig u noqotay wada-xaajoodyada mustaqbalka ee qoondaynta kheyraadka.

## Isticmaalka iyo xoojinta nidaamyada dalka

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay sii waday inay horumar ka samayso dib-u-habaynta maamulka maaliyadda ee qaranka. Wasaaradda

maaliyadda waxay diyaarisay oo ay soo saartay xeerar la xiriira Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud waxayn hadda diyaarinaysaa qorshe hawleed dib-u-habaynta maamul maaliyadeed cusub. Xafiiska Hantidhawraha Guud ayaa dhammaystiray kormeerka warbixinnada maaliyadeed ee DFS sanadkii 2019, iyo sidoo kale kormeerka u hoggaansanaanta sharciga hay'adaha DFS. Warbixinnadan waxaa loo gudbiyay Baarlamaanka waxaana laga dhigay la heli karo. Wasaaradda Maaliyadda waxay dib-u-aasaastay kooxda ka shaqaysa Isticmaalka nidaamyada dalka oo ah madal looga doodo horumarka iyo caqabadaha ku saabsan adeegsiga nidaamyada DFS ee la hawlgala heyadaha caalamiga ah. Talada Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay diiradda saartay hubinta in taageerada beesha caalamka ee hay'adaha dowlada iney u hogaansamaan qodobbada ku xusan xeerka maamulka maaliyadda guud.

### Dheelitirka kharashka dowlada

Hay'ado badan oo madax-bannaan ama hay'ada mabda' gaar ah leh ayaa la abuuray ama la soo jeediyay iyadoo loo sababeenayo sharciyeynta waaxda iyo halbeegyada deeq-bixiyeyaasha. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay ka walaacsan yihiin kor u kicidda dakhliga DFS in ay sababto in kharashaadka maamulka dawladda inay sii kordhiso, taasoo DFS u nuglaysa cillado dakhli, sida dhacday 2020–21. Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu soo jeediyey in DFS ay dejiso siyaasad lagu dejinayo shuruudaha habboon abuurista hay'ad cusub.

## Maareynta kheyraadka dabiiciga ah

### Shatiga Kalluunka Tuunaha

Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu kormeeray horumarka laga gaaray sharci u dajinta dakhliga kasoo xarooda kalluunka iyo qaybsiga dakhliga, laba iyo tobanka bilood, laga bilaabo Luuliyo 2020 ilaa Juun 2021. Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda waxay bixisay guud ahaan 21 shati oo lagu kalluumaysanayo sanadka 2020 qeybtiisa labaad, kaasi oo ku yimid Isfahamkii DFS ay la gashay Ururka Kalluumeysatada dibadaha ee Shiinaha. Dakhligii ka soo baxay shatiga Nofeembar 2019 waxaa lala wadaagay dowlad goboleeda sanadka 2020. Dakhliga ka soo xarooday shatiyada la bixiyay 2020 weli lama shaacin, heshiiskii wadaagga dakhliga ee Maarso 2019-na wuu dhacay.

### Shati bixinta shidaalka iyo gaaska

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay horumar weyn ka sameysay aasaasidda hannaanka sharciga iyo maaliyadda ee maareynta batroolka iyo bixinta heshiisyada wax-soosaar wadaagga shidaalka iyo gaaska. Abaalmarinta heshiisyada wadaagista wax-soosaarka waxaa maamula labada sharci ee kala ah kan Shidaalka ee 2020 iyo kan Iibka Qaranka. Wasaaradda waxaa kale oo ay diyaarisay hindise sharciyeedka Canshuurta Dakhliga ee Hawlaha Macdan Qodida si uu u maamulo shuruudaha maaliyadeed ee heshiisyada wadaagista wax-soosaar, oo ay ku jiraan qiimaha lacagaha iyo nidaamka canshuuraha ee khuseeya. Hindise sharciyeedka ayaa waxaa ansixiyay golaha Wasiirada bishii December 2020, waxaana loo gudbiyay Golaha Shacabka, halkaas oo uu ku sugayo akhrintiisa koowaad. Dhaqangelinta Hindise Sharciyeedkan waa halbeegga dhammaystirka dalalka saboolka.

Guddiga Maamulka Batroolka Soomaaliya waxaa la magacaabay bishii Luulyo 2020. Kadibna waxey billaabeen ruqsad-siinta toddobo xirmo oo xeebaha ku yaal bishii Agoosto 2020, iyadoo waqtiga kama dambaysta ah uu ahaa Maarso 2021. Bishii Nofembar 2020, guddiga wuxuu ku soo daabacday bartiisa intartneedka ruqsadda bixinta qandaraaska iyo qabya qoraalka Heshiiska Wax Soosaar Wadaaga. Si la barbar taal markii la bilaabay howlaha shati bixinta, waxay heyaddu gashay wada xaajoodyo ku saabsan in si toos ah loo bixiyo 10 xirmo oo ah goobo laga sahminayo shidaal oo lala galayo laba shirkadood oo u xilsaaran sahaminta shidaalka.

Guddiga waxay bixiyeen talo ku saabsan horumarkan, kaas oo dhacay ka hor ansixinta baarlamaanka ee Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga ee Hawlaha Macdan Qodida, iyo iyada oo aan la ansixin Guddiga isku-dhafka ah Wasiirrada, sida ku cad Xeerka Iibka qaranka. Talada gudiga dhaqaalaha waxay diiradda saartay hubinta in abaalmarinta Heshiisyada Wadaaggista Wa -Soosaar ay la jaanqaadeyso qaab-dhismeedka sharciga Soomaaliya si aysan DFS si aan habboonayn ugu soo bandhigin halista sheegashooyinka magdhowga mustaqbalka, murannada sharciga, ama qiimaha liita ee lacagta.

Wasaaradda Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta ayaa ugu dambeyn saxiixin wax abaalmarino toos ah wali. Guddiga Maamulka Batroolka Soomaaliya ayaa kordhiyay waqtiga soo gudbinta dalabka ee shatiga ilaa dhammaadka Juun 2021,[2] ka hor inta uusan dib-u-dhigis dambe ku dhawaaqin bisha Juun. Wasaaradda Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta, Guddiga Maamulka Batroolka Soomaaliya, iyo Wasaaradda Maaliyadda ayaa yeeshay wada hadallo lagu xallinayo kala duwanaanshaha u dhexeeya shuruudaha maaliyadeed ee qabyo-qoraalka Guddiga Maamulka Shidaalka ee 2020 iyo kuwa sharciga qabyada ah ee Canshuurta Dakhliga ee Hawlaha Macdan Qodida. Marka wada-hadalladaas la soo gabagabeeyo, maamulka batroolka ee Soomaaliya wuxuu tilmaamay inay u gudbin doonto Guddiga Heshiisyada wax-soo-saarka iyo borotokoolka qandaraaska, si loo ansixiyo.

# Heshiisyada iyo qandaraasyada

Taageerada Guddiga Maamulka Maaliyadda ee kuu beegan bixinta iyo qandaraasyada sannadka 2020–21 waxay dabooshay talo ku saabsan siyaasadda ku aadan soo iibsiga iyo u hoggaansanaanta, dib u eegista qandaraasyada gaarka ah iyo habraacyada qandaraaska, dabagalka joogtada ah ee qandaraasyada horay gudiga dhaqaalaha ooga doodeen.



## Siyaasadda iibka qaranka iyo u hoggaansanaanta

In kasta oo DFS ay horumar samaysay tan iyo 2017kii oo shuruudyo ooga dhigtay in loo tartamo qandaraasyo alaabo aadka u sarreeya ah, sida raashinka laamaha amniga, u hoggaansanaanta Xeerka Iibka qaranka iyo shuruudaha iibka guud ee ku-meelgaarka ah ayaa weli ka maqan dhammaan hay'ado badan oo DFS ah. Xafiiska hanti-dhowraha guud ayaa 2019 taxay dhowr qandaraas oo. qiimahoodu ka badan yahay US $100,000 oo uu Gudigga Maamulla Maaliyadda xaqiijiyay in lagu bixiyay iyada oo aan la marin waaxda soo Iibsiga ee Wasaaradda Maaliyadda. Guddiga Maamulka Maaliyadda ayaa aqoonsaday 14 qandaraas oo noocan oo kale ah, oo qiimihiisu yahay US $4.7 milyan. Waxay u badan tahay in qandaraasyadan ay si toos ah u bixiyeen hay'adaha DFS ee ay quseyso, iyada oo aan loo tartamin. Intaa waxaa dheer, kamay diiwaan gashanayn xafiiska hanti dhowraha guud, sida uu

[2] www.somalialicensinground.com

dhigayo Xeerka Iibka qaranka. Guddiga Maamulka Maaliyadda ayaa ku talisay in wasaaradda maaliyadda iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ay sameeyaan dadaallo firfircoon oo joogto ah, si ey ugu wargeliyaan hay'adaha dowladda dhexe waajibaadkooda, iyo in heyadaha caalamiga ah ay taageeraan DFS, si ay u gaarsiiso barnaamij joogto ah oo ku saabsan taageerada awoodda iyo horumarinta iibka qaranka iyo heshiisyada.

## Iibka qaranka degdegga ah

Faafida caabuqa COVID-19 waxay muujisay sida khaladaadka ka jira awooda hay'adaha DFS ee wax soo iibsiga ay si gaar ah saameyn weyn ugu leedahay xaaladaha degdegga ah. Sharciga iibka qaranka wuxuu dejiyaa mabda'a asaasiga ah ee wax ka beddelidda habraacyada iyo hababka xaaladaha degdegga ah, laakiin Xeerka Iibka iyo Xeerarkiisa midna ma bixiyo tilmaan ama tusaale ku saabsan sida hababka iyo habraacyada loo beddeli karo. Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu ka caawiyay DFS iney sii haysato taageerada farsamo ee Bangiga Adduunka, si loo horumariyo hagitaan faahfaahsan oo ku saabsan iibka degdegga ah. Tilmaan-bixintu waxay qeexaysaa habraacyada quseeya soo iibka degdegga ah waxayna dejin doontaa halbeegyo marka ay tahay in hababkaas gurmadka ah la dabaqo.

## Heshiiska Dekedda Mogadishu

Bishii Oktoobar 2020, kadib laba sano oo wada xaajood ah, DFS waxay heshiis dib-u-eegis deked ah la saxiixatay Al-Bayrak, oo ah shirkad Turki ah oo maamuleysey Dekedda Muqdisho tan iyo 2013. Heshiiska dib loo eegay wuxuu soconayaa ilaa 2034. Heshiiska waxaa uu dhigayaa in 52 milyan oo doollar dakhliga dekedda ah loo qoondeeyo maalgelinta kaabayaasha dekadda shanta sano ee ugu horreysa. Waxa kale oo ay qeexaysaa hannaan ay dowladda iyo Al Bayrak ku heshiiyaan qorshe fog oo daboolaya maalgelinta dekedda laga bilaabo sannadaha lixaad ilaa afar iyo tobnaad, waxayna u suurtogelinaysaa dowladda iney joojiso heshiiska shan sano ka dib haddii qorshaha fog aan la aqbali karin. Dowladdu waxaa laga rabaa iney kaalin firfircoon ka qaadato hirgelinta heshiiska dib loo eegay. Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu ku taliyay in dowladdu ay raadsato caawin farsamo oo dheeri ah, si ay u oofiso gudashada waajibaadkeeda.

## Bixinta qandaraaska baasaboorka

Dowladda waxay bilowday diyaarinta tartan furan sanadka 2020 oo ah heshiis cusub oo ku saabsan soo saarista baasaboorka si loogu beddelo heshiiskii hore. In kastoo, lix shirkadood lagu casuumay iney tartamaan, haddana hal tartame ayaa la helay. Tartame kale ayaa soo gudbiyay cabasho sharci oo rasmi ah oo uu ku codsanayo in hannaanka la joojiyo. DFS waxay go'aansatay inaysan sii wadin hawsha qandaraaska. Waxay taasi beddelkeeda soo saartay iney muddo-kordhin gaaban ugu darto shirkadda hadda haysato heshiiska, si ay u siiso wakhti ku filan , looguna diyaariyo hindise cusub. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay iftiimiyeen ahmiyadda ay leedahay helitaanka khibrad farsamo oo habboon, si loo taageero hannaanka qandaraaska cusub.

## Heshiisyada raashinka laamaha amniga

Heshiisyo ayaa la soo saaray bishii Diseembar 2020, si loogu siiyo raashin qalalan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Booliska, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, iyo Asluubta. Afar qandaraas ayaa lagu tartamay bishii Maaso 2021, si loogu helo sahayda Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed (laba saami), Boolis, iyo Asluub muddo hal sano ah. Nabad sugidda ma aysan furin dalabyadii loo soo gudbiyay heshiisyada raashinka, mana jirin qandaraas la bixiyay. Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu dib u eegayaa casharradii laga bartay tartanki furna 2021, wuxuuna u soo jeedin doonaa dowladda dhexe hagaajinta u hoggaansanaanta wakaaladda iyo u -tartamidda tartanka furan.

### Heshiisyada bixinta buugaagta waxbarashada

Bishii Agoosto 2020, Wasaaradda Waxbarashadu waxay sixiixday wax-ka-baddelka heshiiskii 2016-kii ay la gashay shirkadda daabacaadda Beder. Qandaraaskii 2016, wuxuu Beder siiyay xaq gaar ah oo ay ku hormarinayso manhajka waxbarashada Soomaaliya iyo buugaagta la xiriira, laakiin waxaa ba'saday heshiisku hufnaansha la'aanta shuruudaha qandaraaska ee muhiimka ah, oo ay ka mid tahay lahaanshaha xuquuqda daabacaadda. Wax-ka-beddelidda, oo ay ku jirto mid la sameeyay Agoosto 2020, ma xallin dhibaatooyinkii ku jiray heshiiskii asalka ahaa. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxuu soo jeediyay talooyin ku saabsan tallaabooyinka sixitaanka ee ay qaadanayso Wasaaradda Waxbarashada.

## Dib-u-habaynta maamulka Bangiga Dhexe iyo waaxda dhaqaalaha

Bangiga Dhexe ee Soomaaliya wuxuu sii waday fulinta qorshe-hawleedka waaxda maaliyadda sannadihii 2020–21. Ahmiyadaha waxaa ka mid ah hagaajinta awoodda Bangiga ee quseysa hawlaha muhiimka ah iyo abaabulka, horumarinta nidaamka lacag-bixinta qaranka iyo fududeynta wareejinta heer caalami ah, dib-u-habaynta qaab-dhismeedka sharciga iyo sharciyeynta, iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, si loo taageero u dhexeynta bangiyada dalka.

### Isgaarsiinta iyo sharciyeenta lacagaha moobaylada la iskugu diro

Bnagiga dhexe wuxuu bilaabay bixinta ruqsadaha lacaga bixiyeyaasha qeybtii hore ee 2021-ka, taasoo ka dhigan tallaabo muhiim u ah dadaalka lagu yareeyo khatarta waaxda maaliyadda. Shatiyada waxaa la siiyay Hormuud Telecom bishii Febraayo 2021 iyo Somtel bishii Juun 2021. Labada adeeg bixiyeyaal ayaa lagu qiimeeyay inay buuxiyeen dhammaan shuruudaha sharci siinta ee ku qeexan Xeerarka Lacagta moobayl-ka ee 2019, oo ay ku jirto haysashada shatiga isgaarsiinta oo sax ah oo ay bixisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. Somlink oo ah adeeg lacag bixiye saddexaad ayaa shati la siin doonaa Agoosto 2021.

### Nidaamka lacag bixinta qaranka

Bangiga dhexe wuxuu sii waday in uu samayso horumar wanaagsan, intii lagu jiray 2020–21 xagga horumarinta qaab-dhismeedka nidaamka lacag-bixinta qaranka. Nidaamku wuxuu awood u siin doonaa bixinta lacagaha u dhexeysa bangiyada si toos ah, taas oo yareyneysa isticmaalka macaamil ku saleysan lacag caddaan ah. Waxay u siin doontaa kormeerka bangiga dhexe bixinta adeeg hufan iyo u-hoggaansanaanta sharciga, waxayna sababi doontaa qaadasha deyn nooca waqtiga xadidan. Nidaamka waxaa lagu bilaabi doonaa sagaal bangi bisha Agoosto 2021, ka hor inta aan la gaarsiin dhammaan bangiyada kale ee ka hawl gala waaxda bangiyada.

### Lacagaha xawaaladaha

Inta badan xawaaladaha lacagaha ee ka hawlgala Soomaaliya ayaa lacag caddaan ah u duuliya waddamada xawaaladaha la geeyo xarumaha lacag-siinta, sababtuna waa maqnaanshaha xiriir bangiyeed. Carqaladaynta isu socdaalka iyo safarka adduunka bilowgii caabuqa COVID-19 waxay muujisay jileec ba'an ee nidaamkan. Bangiga dhexe wuxuu ku guda jiraa hirgelinta dib-u-habaynta waaxyo badan ee dhinaca dhaqaalaha aha ah kuwaas oo saldhig muhiim u ah dib u soo celinta xiriirkii bangiyada ee wakiilka Soomaaliya mar dhow. Qiimaynta Halista Qaran ee dalka oo dhan ka socota ayaa wada wadatashiyo daneeyayaalka, iyo Qiimeyn Wadajir ah oo uu sameeyay gudiga

Hawlaha Waxqabadka Maaliyadeed, lacagta lala dhuumaaleysta ee la dhaqay iyo ilaalada maalgelinta argagixisada, ayaa la qorsheeyay 2024. Si kastaba ha ahaatee, la'aanta xiriirka bangiyada ayaa ah arrin weyn oo aysan Soomaaliya kaligeed xallin karin. Ka-hortagga khatarta ayaa weli caqabad ku ah lacagaha xawaaladaha caalamka, waxaana loo baahan yahay taageero laga helo la-hawlgalayaasha caalamiga ah si wax looga qabto.

### Soo celinta hantida

Bangiga waxuu sii waday dadaalladii uu ku soo ceshanayay hantidii dhaxalka ahayd ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, taas oo lagu hayey bangiyo dibedda ku yaal tan iyo 1991. Waxa diiradda la saaray hanti ay Talyaaniga ku lahayd Banca Intesa Sanpaolo iyo Boqortooyada Ingiriiska oo ay lahayd Bangiga Crown Agents, laakiin labada geeddi-socod midkoodna weli lama dhammaystirin.

DIIRADDA

## Dib u habaynta iyo Hagaajinta laamaha Maamulka Maaliyadda

Mawduuca ugu muhiimsan ee sannadkan ee dib-u-habaynta maamulka maaliyadeed wuxuu diiradda saarayaa hagaajinta iyo isuduwidda ka dhexeeya heyadaha dowladda si loo xoojiyo maamulka maaliyadeed. Waxay eegaysaa sida ay hay'adaha iyo la-hawlgalayaashooda caalamiga ahi ay isula jaanqaadi lahaayeen dhaqamadooda iyo siyaasaddooda, dib-u-habayna ugu sameen lahaayeen maamulka maaliyadeed taasi oo ay hoggaamiyaan hay'adaha muhiimka dawladda gaar ahaan Wasaaradda Maaliyadda, Xafiiska Raiisul Wasaaraha, Xafiiska Handti Dhowrka Qaranka iyo Bangiga Dhexe.

Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu arkay in fikirada iyo hab-dhaqanka hay'adaha dhaqaalaha, iyo la -hawlgalayaasha caalamiga ah ee ayaga taageera, aysan mar walba waafaqsanayn ujeeddooyinka guud ee dib-u-habaynta maamulka maaliyadeed ee DFS. In kasta oo isku-dheelitir la'aantani aysan ahayn mid ula kac ah, waxay wiiqi kartaa dadaallada kor loogu qaadayo dakhliga wadanka, hagaajinta hufnaanta kharashka, iyo xoojinta maamulka maaliyadda ee dalka. Sababaha keenay khaladka ayaa waxaa ka mid ah kala mudnaan duwanaanasho iyo danayaasha kala duwan ee heerka waaxda, faham la'aanta la xariirta maamulidda maaliyadda ee dowladda, iyo in loo arko shuruudaha habraaca iyo janjeeridda inay tahay caqabado laga kaaftoomo.

## Meelaha ay ka jirto is waafajin la'aan

### Falalka dakhliga waaxaha ee wax u dhimaya isku xirnaashaha maaliyadda

Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay arkeen iskudayo badan oo ay sameeyeen qaybaha waaxda si ay u helaan kheyraad dheeri ah oo loogu tala galay kharashaadka ka baxsan hannanka miisaaniyadda. Iyada oo la fahmi karo dadaalada lagu doonayo lacaga dheeri ah oo lagu maaraynayo kharashaadka, saamaynta guud waxay noqon kartaa mid looga fogaanayo daacadnimada, dhamaystirnaanta iyo hufnaanta diyaarinta iyo fulinta miisaaniyadda. Saamayntaan ayaa noqonaysa dhibaato soo korodha marka la eego xaaladaha khayraadka xaddidan ee DFS. Tusaaloyinka tallabooyinkaasi waxaa ka kid ah:

*Heshiisyo loogu qoondaynayo:* Heshiishyada oo si fiican loo qaabaynin waxay xaddidi kartaa hufnaanta isticmaalka dakhliga waaxda ama/ iyo maalgashiga ka baxsan miisaniyadda ilaa iyo heer aan si xeeldheer loogu baarin ama si aan waafaqsanayn shuruucda wax soo iibsiga. Taasina waxay keeni kartaa in aan adeegyada aysan u qalmin lacagaha DFS iyo sidoo kale in ay si guud u lunto hufnaanta maaraynta dakhliga iyo kharashaadka.

*Xannibaadda lacagaha lasoo ururiyay:* waaxyada oo reebanaya lacagihii lasoo ururiyay taasi oo aanan waafaqsanayn sharciyada waxay ku ahayd dhib weyn DFS intii u dhexeysay 2016 ilaa 2017kii. Dib u habaynta lacagaha Wasaaradda Maaliyadda waxay yareeyeen falalkaasi in kastoo ay warbixinta xisaab hubinta Hanti Dhowraha Qaranka ay tilmaamayso in ay wali sii jirto. Warbixinta kormeerka sanad maaliyadeedka 2019 waxay tilmaantay US$1.86 milyan ay saddex waaxood ku isticmaaleen goobihii laga soo uruurshay.

*Qondaynta Lacagaha:* Lacagaha la qondeeyay oo lagu hindisay shuruucda waaxda waxay keeni kartaa in si abadi ah loogu qoondeeyo qayb ka mid ah dakhliga dawladda qaybaha waaxda ama loo qoondeeyo ujeedooyin gaar ah. Hadii waaxaha ay qimayn karaan dhakligooga si ku saleysan shuruucda, Wasaaradda Maaliyadda waxay xakamayn wayneysaa sharciyada miisaniyadda taasi oo keeneyso in lacagihii loo qoondeeyay aanay ka tarjumin mudnaanta DFS.

## Dib u habaynta hay'adaha gala kharashaad lacageed

Meel-marinta shuruucda waaxyada waxay abuuraysaa hay'ado cusub oo dawli ah, iyado oo ay si kordhayso kharashka ku baxa hay'adahaasi. Miisaaniyadda DFS ee 2021 waxaa ku jira lacago loo qoondeeyay 18 hay'ado dowli ah oo madax banana taasi oo noqotay US$29 milyan. Taasi oo u dhiganta boqolkiiba 11 dakhliga dawladda. Hay'ado kale oo 16 ah ayaa la dhisayaa. Dhismaha hay'adahaasi waxaa keena shuruucdaha saamileyda caalimaga ah iyado oo kujirto qaabka dib u habaynta ama shurudaha deeq bixinta. Waxaa kale oo lagu soo hindisi karaa xeerka shuruucda waaxda taasi lagu qora iyada oo la kaalmaysanaya hay'adaha caalamiga ah. Waaxyaha DFS waxay si fiican u soo dhaweeyeen samaynta hay'adaha maadama ay waaxda tani u keeni karto waxqabadyo wax kuool ah.

Tani waxay keenaysaa in loo ololeeyo sameynta hay'adaha dawli ah mararka qaarkood. Hay'adaha dawli ah oo si buuxda u madax banaaneyn waxay ka difaaci karaan waxqabadyada in siyaasadda ay soo fara galiso. Waxqabadyada xeerarka ujeedooyinka leh waxaa lagu dardar galin karaa in la dhiso hay'ado looga dan leeyahay ujeedoyin khaas ah.

## Laamaha sharciyada ee ka hor imaanaya shuruucda maamulka maaliyadda

Hay'ad la garan karo oo ka mid ah sharciyada DFS sida, sharciga iibka qaranka 2016, sharciga PFM 2019, iyo sharciga dakhliga 2019, ayaa bixiya aasaaska maamulka maaliyadeed ee DFS. Sharciyadan waxaa loogu gol lahaa in lagu dhaqo dhammaan hay'adaha DFS, si loo waafajiyo qaab-dhismeedka Soomaaliya iyo in la waafajiyo dhaqanka caalamiga ah. Sharciyada u gaarka ah laamah ayaa la filayaa in ay u adeegaan hawl dhammaystiran, iyada oo daboolaysa siyaasadda qaybaha gaarka ah iyo arrimaha hay'adaha ee hoos yimaada awoodaha wasaaradda laamaha ay khusayso. Rajada laga qabo ayaa ah in sharciyada isdhaafsiga iyo qaybaha waa in la diyaariyo oo si is waafaqsan loo fuliyo.

Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay la kulantay xaalado uu sharciga laamaha DFS awood u siinaya in la baalmaro qodobbada sharciyada maamulka maaliyadda haddii ay ka hor imaanayaan sharciga qaybta ee khuseeya. Caqabado ayaa sidoo kale ka dhacay marxaladda diyaarinta sharciga laamaha, oo wasaaradaha iyo deeq bixiyayaasha caalamiga ah ee bixiya kaalmada farsamo ay u diyaariyaan hindise sharciyeedyo qabyo qoraal

ah ee Baarlamaanka iyada oo aan si waafi ah loo tixgalinayn joogtayntooda iyo la jaanqaadkooda sharciga wada quseeya ee maamulka maaliyadda. Muranka ku saabsan ku-dhaqanka shuruucda maamulka maaliyadda ee qaybaha gaarka ah waxay wiiqi kartaa guud ahaan maamulka maaliyadda.

### Habraaca nidaamyada Iibka qaranka iyo qandaraasyada ee aan dabaqin nidaamka dhigan

Tixgelin la'aanta habraacyada iibka qaranka iyo qandaraasyada ayaa si isdaba-joog ah uga dhacay dhammaan qaybaha DFS. Badanaa, ujeeddada hay'adaha waaxdu waa inay sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah u racaan iibka qaranka. Deg dega ayaa keena inay ka dhalato qorshe la'aan iyo diyaargarow la'aan, sida in qandaraasyada hadda jira ay ku dhow yihiin inay dhacaan ama shuruudaha muddada dheer la sugayay ee alaabta iyo adeegyada la dayaco ilaa ay noqdaan kuwo degdeg ah. Marka la eego cadaadiskaas, hay'adaha laamuhu waxay raadiyaan in ay si degdeg ah ula socdaan shuruudaha 'degdegga ah' iyaga oo daaf marayaayo hababka.

Saamaynta guud ee maamulka maaliyadda ee la' isku filnaansho oon aan u hogaansaneen nidaamka cadaaladda waxay yareysaa hufnaanta bixinta qandaraasyada wax iibsiga iyo hesihiisyada; in la siiyo shirkadaha hadda jira iyo qandaraaslayaasha si fiican ugu xiran faa'iido aan caddaalad ahayn; si loo yareeyo qiimaha lacagta; in la xaddido awoodda DFS ay ku maareyso qandaraasyada keenista badeecadaha, shaqada, iyo adeegyada; iyo in loo bandhigo DFS caqabaha dhanka sharciga ah. Horumar ayaa laga gaaray baahida waaxyaha si ay u qaataan qandaraasyo tartan ah oo heshiisyowax iibsiga ah oo qiimo weyn leh iyo qandaraasyo labadii sano ee la soo dhaafay, laakiin u hoggaansanaan buuxda weli lama gaarin.

### Maalgalinta deeq bixiyayaasha ee hay'adaha DFS ee garab mara nidaamka dowlada

Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud waxa uu dhigayaa yahay in lacagaha laga helo saaxiibada caalamka lagu daro miisaaniyad sanadeedka DFS laguna maamulo iyada oo loo marayo Khasnadda dhexe ee dowladda. Komeerada Hanti Dhowrka Guud ayaa daaha ka qaaday marar badan oo ku-dhaqan la'aan ka hor ansixinta sharciga. Iyadoo deeq bixiyayaasha caalamiga ah qaarkood ay mar hore u hoggaansameen Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud ama ay u socdaan u hoggaansanaanta, dadaallada joogtada ah iyo feejignaanta arrintan ayaa muhiim u ah in laga fogaado maalgelinta deeq-bixiyeyaasha si aan ula kac ahayn loo wiiqo dadaallada lagu xoojinayo nidaamyada sharciga iyo abuurista fursado loogu talagalay leexinta maaliyadda iyada oo loo marayo kormeer aan tayo lahayn.

## Talooyinka iyo soo jeedinta Guddiga maamulka maaliyada FGC



Waxaa kamid ah khataraha maamulka maaliyadeed ee istaraatiijiga ah ayaa ka dhashay habayn ama isku dheelitirnaan la'aanta laamaha iyo dawladda dhexe. Kuwaas waxaa ka mid ah, baaxadda dowlada oo aan la awoodi karin, xakamaynta misaaniyada oo liidata, ku biirinta maamullada xafiisyada, iyo kobcinta awoodda hay'adeed ee aan is-waafaqsanayn.

Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu u soo jeedinayaa DFS inay tix galin gaar ah la siiyo dhowr arimood si wax looga qabto caqabadahan. Waxaa

kamid ah: talaabooyin gaar ah si kor loogu qaado wacyigalinta wax yaabaha looga baahan yahay qaybahaha maamulka maaliyada iyo tayaynta awooda hanaanka hay'adaha soo bilaabida iyo fulinta shuruucda rasmiga ee DFS iyo bilaabida wakaaladaha cusub ee ismaamulada; iyo dib u-eegis wasaarada maaliyada oo nidaamsan dhammaan sharciyada qabyada ah ee quseeyo maaliyada, sida uu farayo Xeerka PFM iyo in taageerada hay'adaha DFS ay tahay miisaaniyad iyo khasnad ayna xooga saarto hubinta kabaxsan ama dibeda ee laamaha hay'adaha.

Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu ku talinayaa in saaxibada caalamiga ahi ay mudnaanta siiyaan dhowr tallaabo oo is-kaabaya si loo beddelo qaabka ay uga shaqeeyaan Soomaaliya. Kuwaas waxaa ka mid ah: yaraynta soo jeedinta abuuritaanka wakaalado cusub; iyadoo la tixgelinayo shuruucda guud ee maamulka maaliyadeed marka la qorshaynayo lana bixinayo taageerada laamaha; iyadoo la tixgelinayo saamaynta ay ku yeelanayso taageeradooda baaxadda iyo awood u-lahaanshaha dawladda; keenista dhammaan kaalmada maaliyadeed ee hay'adaha DFS miisaaniyadda iyo khasnadda; iyo taageeridda xoojinta awoodda maamulka maaliyadeed ee heer waaxeed.

## Hortabinada Maamulka Maaliyadeed ee 2021-22

Caqabadaha maaliyadeed iyo siyaasadeed ayaa la filayaa inay sii socdaan ilaa iyo 12-ka bilood ee soo socda laga bilaabo bisha Luulyo 2021. Jawiga xaaladaha maaliyada Soomaaliya waa mid adag oo leh caqabada badan, marka lagu laro doorsashada iyo saamaynta caabuqa. Marka la eeego arimahan waxa dhibaato soo food saartay maamulka maaliyada waqti xaadirka iyo 12-ka bilood ee lasoo dhaafay waxaana laga yabaa inay sii jiraan.

Asigoo kahor tagaya dib-u-dhaca siyaasada, misaaniyada iyo cadaadisyada maamulka maaliyada, Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu joogteyn doonaa oo uu ku dhisi doonaa arrimaha muhiimka ah tii sannadkii hore. Afarta arrimood ee mudnaanta leh waxaa ka mid ah dib -u -habaynta misaaniayada (oo ay ku jirto misaaniyada federaalka), heshiisyada iyo qandaraasyada, dakhliga kheyraadka dabiiciga ah, iyo maamulka bangiga dhexe. In kasta oo horumar qiimo leh laga sameeyay dhammaan afarta aag, haddana ajendayaashan ayaan weli ma idlaan. Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu ku dhiirri gelin doonaa Wasaaradda Maaliyada inay horumariso istiraatiijiyad deyn qaadashada oo rasmi ah si kor loogu qaado awoodda Soomaaliya si ay si hufan u maamusho deynta hadda iyo mustaqbalka.

Ajandaha Gudigga ee 2021–22 waxaa ku jiri doona dadaal xooggan oo dhinac kasta ah si loo dhiirri-geliyo dib-u-habayn xooggan oo oo laga dhexsameeyo waaxaha iyo dib-u-habaynta maamulka maaliyadda, iyo in la dhiirrigeliyo joogtaynta misaamiyada. Xiriirinta maamulka maaliyadeed ee tooska ah ee ka jira dhammaan hay'adaha DFS, iyo guud ahaan taageerada lamaanaha caalamiga ah ee hay'adahaas, ayaa si weyn loo xoojin doonaa. Ahmiyad gaar ah ayuu Guddiga Maamulka Maaliyadda siin doonaa joogtaynta maaliyadeed marka la eego kobcinta dakhliga gudaha ee xaddidan, oo ay weheliso kororka mushahaarka shaqaalaha dowladda iyo kobaca guud ee baaxadda dawladda.

